## Yaan la xiriirayaa haddii aan walaacyo ka qabo kiiskayga kaas oo aan aanan xal kala gaari karin shaqaalahayga kiiska ee FVS?

Haddii aad cabasho ama welwel ka qabto sida kiiskaaga looga shaqeynaayo, wac kormeeraha shaqaalaha kiiskaaga ee FVS. Haddii walaacyadaada aan wali xal laga gaarin, waxaad wici kartaa Maamulaha Aagaaga.

Waxaad sidoo kale wici kartaa Xafiiska Xiriirada Deegaanka oo aad ka wacayso 800-723-4831 ama 360-902-8060 si aad u hesho caawimaad marka aad doonto.

Xafiiska Xiriiriyaha Qoyska iyo Carruurta ee Gobalka Washington ayaa qabta tabashooyinka iyo cabashooyinka la xiriira hawlaha Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska) wuxuuna awood u leeyahay inuu baaro tabashooyinka. Waxaad kala xiriiri kartaa 800-571-7321.

### Si aad u hesho xog dheeraad ah booqo:

**https://dcyf.wa.gov/services/child-welfare-system/cps**



**Xogta Shaqaalaha Kiiska:**

Magaca: ______________________________

Taleefoon: ______________________________

Iimaylka: ______________________________

**Xogta Kormeeraha Shaqaalaha Kiiska:**

Magaca: ______________________________

Taleefoon: ______________________________

Iimaylka: ______________________________

### Hel xafiiska DCYF ee deegaankaaga:

Iskaan garee Koodhka QR, ama booqo:
**https://apps-ca-ext.dcyf.wa.gov/CAOfficesPub/offices/general/OfficePick.asp**

*Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimeylka* ***communications@dcyf.wa.gov****.*

DCYF PUBLICATION CWP_0035 | DSHS 22-1751_SM (03-2025) Somali

# Family Voluntary Services (Adeegyada Mutadawacnimada ee Qoyska)

*Xoojinta Qoysaska ayadoo la adeegsanaayo Ku xirista Adeegyada iyo Khayraadka Taageerada*



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

## Waa maxay Family Voluntary Service Services (Adeegyada Ikhtiyaarka Qoysku, FVS)?

FVS waa barnaamij u sahlaaya waalidiinta/masuuliyiinta sharciga ah inay doortaan inay ka qaybgalaan adeegyada si ay u daboolaan baahiyaha badqabka, caafimaadka iyo faha qabka ee carruurtooda.

Yoolka FVS waa in qoysaska laga taageero la fal gelida adeegyada si loo buuxsho baahiyaha qoyska ayadoo haddana la xoojinaayo lana ilaalinaayo midnimada qoyska.

Shaqaalaha kiiska ayaa kala shaqeeya qoysaska samaynta qiimeynta awoodaha, baahiyaha, iyo badqabka ilmaha. Qoysaska ayaa dooran kara inay joojiyaan inay la shaqeeyaan Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska, DCYF) marka ay doonaan. Haddii qoys doorto inuu joojiyo adeegyada FVS, shaqaalaha kiiska ayaa laga doonayaa inay qiimeeyaan heerka badqabka iyo khatarta kahor inta aan kiiska la xirin. Haddii ay jirto baahi aan la buuxin oo la xiriirta badqabka ilmaha, DCYF ayaa ka codsan karta in maxkamadu soo faro geliso ayadoo gudbinaysa dacwada ilmo masuul laga yahay.

## Siday FVS u shaqaysaa?

FVS ayaa la bixin karaa kadib kiiska CPS marka adeegyada iyo khayraadku ay taageeri karaan qoyska si loo xaqiijiyo badqabka ilmaha iyo xasiloonida qoyska.

Qoysaska ayaa sidoo kale codsan kara adeegyada FVS marka ay jirto baahi ayagoo wacaaya DCYF.





## FILASHOOYINKA

### Waxa aad ka filan karto shaqaalaha kiiska ee FVS

- Wuxuu kula dhaqmi doonaa adiga iyo qoyskaaga qadarin.
- Wuu kula shaqeyn doonaa wuxuuna dejin doonaa qorshe si loo ilaaliyo badqabka carruurtaada iyo inuu xaqiijiyo in ilmahaagu helaan baahiyahooda aasaasiga ah.
- Waxay ku siin doonaan adeegyada gaarka u ah adiga iyo qoyskaaga, sida waxbarashada waalidnimada, tallo bixinta, ama daawaynta. Booqo webseedka DCYF si aad u hesho liiska intaan ka balaaran ee adeegyada iyo khayraadka.
- Wuxuu la kulmi doonaa qoyskaaga iyo si gaar ah ilmahaaga oo guriga jooga ugu yaraan halmar ilaa labo jeer bishii.
- Wuxuu la xiriiri doonaa bixiyaasha adeegga, iskaashatada bulshada, qoyska iyo saaxiibada (marka aad u ogolaato) si loo helo fikir dadka kale ee ku aadan adiga iyo hormarka qoyskaaga.
- Wuxuu kaala hadli doonaa badqabka shaqsiyadaada iyo ilmaha dhashay/socod baradka ah.
- Haddii cunugaaga looga shakiyay in dano galmo ganacsi looga faa'iideystay, wuxuu kaa caawin doonaa samaynta qiimeynta wuxuuna ku siin doonaa adeegyo.
- Wuxuu kugu dhiiri gelin doonaa inaad la shaqeyso kaaliye adiga oo kale ah ama inaad ka qaybgasho koox taageero markasta oo la heli karo.

### Waxa shaqaalahaaga kiiska ee FVS kaa filanaayo

- Inaad ka qaybgasho hanaanka qiimeynta aadna ka caawiso abuurista qorshe lagu xoojinaayo faya qabka qoyskaaga iyo xasiloonida mudada dheer.
- Inaad raacdo qorshaha badqabka (haddii aad haysato).
- Inaad ka qaybgasho adeegyada lagu xoojinaayo faya qabka qoyskaaga iyo xasiloonida mudada dheer.
- Inaad u ogolaato shaqaalahaaga kiiska FVS inuu ilmahaaga si qaas ah ula kulmo.
- Inaad si joogto ah ula kulanto shaqaalaha kiiskaaga ee FVS.
- Inaad u sheegto shaqaalaha kiiska ee FVS isbadello kasta oo ku dhaca xaaladaada.
- Inaad saxiixdo baahinta xogta adiga iyo ilmahaaga.
- Inaad la wadaagto awoodaha, baahiyaha, iyo xaaladaha qoyskaaga.